

## Bayaanka Sinnaanta ee DES

Oktoobar 2022

Markay taariikhdu ahayd Maarso 21, 2022, Guddoomiye Inslee wuxuu saxiixay Amarka Fulinta 22-04 oo fulinaya Qorshaha iyo Buuga Ciyaarta ee Pro-Equity Anti-Racism (PEAR, Sinaanta Ka-hortagga Cunsuranimada) ee Gobolka Washington isaga oo faraya dhammaan wakaaladaha golaha wasiirada in ay horumariyaan oo ay fuliyaan Qorshe Hawleedka Xeeladeed ee PEAR.

Amarka Fulinta, Barasaab Inslee waxa uu la wadaagaa hiigsii lagu dhisayo nidaamka deegaanka PEAR ee gobolka Washington wuxuuna caddeeyey ujeedadiisa in dhammaan wakaaladaha gobolka ay qaataan qaybtooda. Department of Enterprise Services (DES, Waaxda Adeegyada Ganacsiga), waxaan aqoonsan nahay in ku milida mabaadii'da isku dhafnaanta, sinaanta iyo wadajirka dhammaan qaybaha shaqadeenu ay muhiim u tahay fulinta shaqadeena "xoojinta ganacsiga dawlada." Sidoo kale waa waxa saxda ah ee la sameeyo.

Shaqadaan ayaa muhiimad wayn noo leh. Inkastoo aanaan badeli karin falalka xadgudubka iyo takoorka ku dhisnaa ee lasoo maray, waxaan maamuli karnaa dhaqanka hadda ee goobteena shaqada iyo adeegyada aan siino dawlada gobolka iyo tan maxaliga ah.

Kooxda Hoggaanka DES, oo si dhow ula shaqaynaya wakaaladda kooxda wakaaladeeda PEAR, waxaa ka go'an in ay dhisto awoodaha iyo awoodda lagama maarmaanka u ah in ay u qabato shaqadan qaabka macno buuxa leh. Iyadoo mas'uuliyaduhu ay si weyn ugu kala duwan yihiin khadadkeena ganacsi ee badan, waxaan ognahay in mid kasta oo naga mid ah uu yahay inuu sameeyo shaqadeena si aan u hubino inaan si buuxda ula shaqeyneyno macaamiisheena iyo daneeyayaasha.

## Waxaan sidoo kale si firfircoon u raadineynaa Maalgelinta Khadka Adeegga ee soo socda

- Dhis oo geyso **Qorshe Hawleedka Xeeladeed ee PEAR** dhammaan Hawlaha Hoggaaminta & Adeegyada si aan u taageerno hadafyada sinnaanta wakaaladda iyo sidoo kale yoolalka dhammaan wakaaladaha kale ee gobolka ee aan taageerno.
- Samee **xeeladaha ka qaybgalka bulshada** taas oo hubin doonta isku xirka wakaalada iyo ganacsiga iyo kobcinta ka qaybgalka PEAR iyo iskaashiga bulshada.
- Abuur **farsamooyin si loo taageero wakaaladaha yaryar ee DES** ay siiso adeegyada si looga caawiyo inay yeeshaan awood ay ku fuliyaan istaraatiijiyadaha PEAR oo saamayn wanaagsan ku yeelan doona macaamiishooda iyo xubnaha bulshada.

Waxaan rajeynayaa inaan la sii wadno safarkaan shaqo mid kasta oo idinka mid ah, iskaashatadeena, iyo Office of Equity (Xafiiska Sinnaanta). Fadlan haka labalabeyn inaad ila soo xiriirto aniga, Sarkaalkeena Sare ee Sinnaanta Dhaktoorka Adrian Thompson, ama xubin kasta oo ka tirsan Kooxda Hoggaanka DES oo qabo su'aalo ama fikrado.

Daacadnimo,

Tara C. Smith  
Agaasime